

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENCY

Ref:.....JSL/M/GW/081-811/122011

DATE: ..... 13/12/11

Ku: Shir-gudoonka Golaha Wakiilada JSL

Hargeysa

Og: Shir-gudoonka Golaha Guurtida JSL


Hargeysa

Ujeedo: Dhaqan-galka Wax Ka Bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Golahayaasha Deegaanka iyo Madaxtooyada Xeer Lr. 20/2011 Lifaafa 3aad

Mudanayaal,

Waxaan halkan idiinku soo gudbinayaa Xeer Madaxweyne No: 0182/122011 ee 13/12/11 oo lagu baahinayo dhaqan-galka Wax Ka Bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Golahayaasha Deegaanka iyo Madaxtooyada Xeer Lr. 20/2011 Lifaafa 3aad.

Allaa Mahad Leh,

  
Cali Axmed Cali 14/12/11  
Xog-hayaha Gaarka ah ee Madaxweynaha JSL



*Arkiifka*

*Xaree 19/12/2012*

*Ha la file gareeyo*

*16/12/2011*

*PL:140*  
**RECEIVED**  
*14/12/2011*

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT

REF. JSL/M/XERM/249-807/122011

DATE 13/12/11

**XEER MADAXWEYNE No: 0182/122011**

**Dhaqan-galka Wax Ka Bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka  
Golayaasha Deegaanka iyo Madaxtooyada Xeer Lr. 20/2011 Lifaafa 3aad**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Helay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee Go'aan Lr. GW/KF-16/551/2011, ee Ansixinta Wax Ka Bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Golayaashak Deegaanka iyo Madaxtooyada Xeer Lr. 20/2011 Lifaafa 3aad;
- Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Wuxuu Soo Saaray;**

Qodobka 22<sup>aad</sup> oo ah habka doorashada Golayaasha Deegaanka;

Qodobkan oo ahaa habka liistada waxaa laga dhigay oo loo badalay sidan;

1. Xisbi/Urur kasta oo doonaya in uu ka qayb galo doorashada Golayaasha Deegaan, waa in uu komishinka Qaranka u gudbiyo liiska musharaxiinta uu u xulay inay uga tartamaan doorashada oo degmaysan, kaas oo ku salaysan tirada kuraasida Degmo kasta loo xadiday, una qoran si taxane ah, waana in komishinku siiyaa musharax kasta astaan u gaar ah.
2. Kuraasta Degmo-doorasho, waxaa Axsaabtu/Ururadu ku kala helayaan habka saami qaybsiga (Proportional Representation System) ee kuraasida iyo codadka Xisbi/Ururkasta ka helo Degmadaas, iyadoo uu Xisbiga/Ururkuna ay musharaxiintiisu ku kala guulaysanayaan sida ay u kala codbadan yihiin.
3. Musharaxiinta ku guulaysan waaya doorashada Deegaanka waxay noqonayaan kayd, iyadoo loo kala qaadanayo sida ay u kala codbadan yihiin, marka xubin ama xubno ka mid ah Golaha Deegaanku uu baneeyo xilka.



**Qodobka 33<sup>aad</sup> Faqradiisa 4<sup>aad</sup>**

Qodobkan 33<sup>aad</sup> Faqradiisa 4<sup>aad</sup> oo ahaa qofka isu taagaya doorashada Golayaasha Deegaanka waa in aanu/aanay da'diisu/Dadeedu ka yaraan 35-jir sanadka doorashada

Waxaa loo bedalay qodobka sidan:

Qofka isu taagaya doorashada Golayaasha Deegaanka waa inuu/aanay Da'diisu/Dadeedu ka yaraan 25-jir sanadka doorashada.

Allaa Mahad Leh,

  
Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland





Ref GW/G/KF-16/551/2011

Date 07/12/2011


**Ujeedo: - Go'aanka Ansixinta Wax ka-badalka iyo kaabista Xeerka  
Doorashooyinka Madaxtoovada iyo Golayaasha Deegaanka  
(Xeer No.20/2010) lifaaqa Saddexaad**

**GOLAHA WAKIILADA JSL**


- MARKUU ARKAY:** Qodobada 9<sup>aad</sup>, 22<sup>aad</sup>, 83<sup>aad</sup> iyo 111<sup>aad</sup> ee Dastuurka JSL.
- MARKUU TIXGALIYAY:** Mooshinkii ay soo jeediyeen Mudanayaasha Golaha wakiilada ee **10/10/2011** ee ku saabsanaa Wax ka-badalka iyo kaabista Lifaaqa saddexaad ee **Xeer Lr.20/2011** Qodobadiisa **22aad** iyo **Qodobka 33aad** faqradiisa **4aad**
- MARKUU ARKAY:** Go'aanka ansixinta Waxka-badalka iyo kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka (Xeer (No.20/2010) lifaaqa saddexaad ee Golaha Guurtida JSL. kuna taariikhaysnaa **23/11/2011 (Eeg Lifaaqa).**
- MARKUU ARKAY :** In Golaha Guurtida wax ka badal iyo kaabis ku samaynin Waxka-badalka iyo kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka (Xeer (No.20/2010) lifaaqa saddexaad kuna ansixiyeen sidii Golaha Wakiiladu ugu Gudbiyeen .

**WUXUU**

Golaha Wakiilada JSL halkan ugu soo Gudbinayaa Madaxwaynaha JSL Waxka-badalka iyo kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka (Xeer (No.20/2010) lifaaqa saddexaad si uu uga guto waajibaadkiisa dastuuriga ah.

  
C/risaaq Siciid Ayaanle  
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada

**ALLAA MAHAD LEH**

  
C/raximaan Maxamed C/laahi(Ciro)  
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL



**Wax ka badalka iyo kaabista Xeerka doorashooyinka Madaxtooyada  
iyo Golayaasha Deegaanka ( Xeer Lr.20/2011)**

**Lifaaqiisa<sup>3aad</sup>**

***Qoddobka 22<sup>aad</sup> oo ah habka doorashada Golayaasha Deegaanka;***

Qoddobkan oo ahaa habka liistada waxaa laga dhigay oo loo badalay sidan;


1. Xisbi/Urur kasta oo doonaya in uu ka qayb galo doorashada Golayaasha Deegaan, waa in uu komishinka Qaranka u gudbiyo liiska musharaxiinta uu u xulay inay uga tartamaan doorashada oo degmaysan, kaas oo ku salaysan tirada kuraasida Degmo kasta loo xadiday, una qoran si taxane ah, waana in komishinku siiyaa musharax kasta astaan u gaar ah.
2. Kuraasta Degmo-doorasho, Waxaa Axsaabtu/Ururadu ku kala helayaan habka saami qaybsiga (*Proportional Representation System*) ee kuraasida iyo codadka xisbi/Ururkasta ka helo Degmadaas, iyadoo uu xisbiga/Ururkuna ay musharaxiintiisu ku kala guulaysanayaan sida ay u kala codbadan yihiin.
3. Musharaxiinta ku guulaysan waaya doorashada Deegaanka waxay noqonayaan kayd, iyadoo loo kala qaadanayo sida ay u kala codbadan yihiin, marka xubin ama xubno ka mid ah Golaha Deegaanku uu baneeyo xilka.


***Qoddobka 33<sup>aad</sup> Faqradiida 4<sup>aad</sup>***

Qoddobkan 33<sup>aad</sup> Farqadiisa 4<sup>aad</sup> oo ahaa qofka isu taagaya doorashada Golayaasha Deegaanka waa in aanu/aanay da'diisu/Dadeedu ka yaraan 35-jir sanadka doorashada.

***Waxaa loo badalay qoddobka sidan:-***

Qofka isu taagaya doorashada Golayaasha Deegaanka waa inuu/aanay Da'diisu/Dadeedu ka yaraan 25-jir sanadka doorashada.

  
C/risaaq Siciid Ayaanle  
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada

  
C/raxmaan Maxamed Cirro  
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL

